33. DUMAR III

Aw. Daa/ … … … ki wax u doonayaa waana badan yahay sidii loo ururin lahaana way adkaaneysaa, waayo waa hadallo meel walba gelayoo oo tira badan oo meel loogu wada hagaagi karaa aanu jirin, qofna markaa wada xusuusan karin; haddaynnu u nimaadno haweenka amaantooda iyo ceebtooda waa fara badan yihiin, waa yahay dhaqankeynii oo dhan baa dee ka kooban ammaan iyo xumaan. Waxaa jirtay nin afar dumar ah qabay oo nin kale oo wax weydiiyay doonayey inuu tusaaleeyo ay saaxiib yihiin oo intuu hal u qalay afartiisii haween ahaana isugu yeeray hashiina qaybiyay oo afar waaxood ka dhigay oo mid walba addinkeedii halkaa u dhigay. Hilibkii derinta ahaana mid walba ugu riday saab weyn isugu yeeray ee la yiri mid: “Naa qaado”, waa qaadatay, midna markaasuu yiri: “Caruurta u qaad”, midna wuxuu yiri: “Inoo qaad”, midna wuxuu yiri: “Ii qaad”. Horta naagihii marka dabeecadoodu halkaa beyba ku dhantahayba midiba siday ula macaamilooneysay ninkeeda iyo reerka afartaa hilib ee uu qaybiyay oo qura uun baa ku tusaya. Waa yahay naagta wax bixisa ee lagu amaanayo waa haddii ninkeeda raali kala yahay yaa reerka oo ninku ku farxayaa naagtiisana ku waaniyay weeyaan reerka sidaas oo kale ku bulaaliya ee ku wanaagsani, reerka ninku aanu ogaleyn ama aanu naagtu oggoleyna khilaaf baa weligood ka dhex dhaca oo ama ninkaa markuu reerka wax ka bixinayo naagtu ku qabsataa oo laysku dilaa ama ninkii oo aan raalli ka ahayn baa naagtii reerka lumisaa markaas naagtii haysanmaayo oo reerkiiba ka saaraa. Waa horta haddii labaada horta waa isla wada ogolyihiin ama yey wax oo wada bixinin ama yey wax ha wada ogolaadeene waa oo behemayane labadii isku dabeecad ah uun baan iska hor immaanayn ee sida wax reerka loo wada dhaqdaa sidaa weeye.

Waa yahay. Afarta naagood ee uu hilibka u qaybiyay waxay ku tusaysaa tan uu yiri: “Qaado”, in aanu ka daba tagaynin oo shuqul dambeba ku lahayn midna wey u caddayd oo uu yiri “Qaado”, midna hadduu yiri: “Caruurta u qaad”, inaanu isagu shuqul ku lahayn oo naagtaa iyo ninkeedu isku wanaagsanayn yuu saaxiibkii uga warramayey oo dabadeedna waa taa. Haa, tan uu yiri: “Inoo qaadna”, inay saaxiib yihiin oo wax wada cunaanoo naagta iyo ninkuna isku wanaagsan yihiin bay ku tusaysaa, naagta uu yiri: “Ii qaadna”, inay tahay tii naftiisa ku xirnayd iyo dhaqaalihiis yey markaa ku tusaysaa haa oo uu naagahana taa u jecelyahay, waa yahay.

Dabeecadaha horta haweenka loola socdaa ayadaa is muujisay marka siduu labaad yaa la iska bexisay siduu ninku ugu macaamiloon lagaa buu saaxiibkii ugu warramayey taasi horta halkaa yaan ku dhaafayaa. Magacyada loo yaqaano naagaha kelmadaha lagu caayo horta Baali waa loo yaqaan oo kasu isagu waa hirgalay, Arrero waa hirgalay, Arraajana waa hirgalay oo waa naag liidata, uun Basari isaguna waa hirgalay, Ayaanso waa hirgalay, Gallaaco wuu hirgalay, wixii oo dhaminna waa isku wada macni oo waa naag liidata oo baalinimadii baa wada dhashee oo waxna waa lakala rogrogay oo waa isku raasoo waxaynu u jeednaa halla wada barto baalidii, basar, intaas oo dhanna waa isku wada rees, oo waa wada xumaantii.

Ammaantii haddaynu u nimaadno, Gaari baa wadata waa yahay gaarida maxaa ka sareysa oo haddeerto aan lagu macaamiloon? Oo kelmo baaba’aysa ah Dabeyl baa baaba’aysa, beri dhoweyd waaba lagu

murmadoo waxa la yiri rag odayaala ah ayaa yiri, kelmad haween ka lagu caayo tan ugu xun yaa Dabeyl ah markaasaa dabadeed ragna yiri, kelmad lagu ammaano haweenka iyo fardaha labada guud hadal isku yiraahdo kelmadda ugu sareysa ee lagu amaanaa waa Dabeyl oo fardahana neefka bahda u ah waa neef dabeelayd ma faraska markay tartamayaan aadan arag neef raaci karaa ma jiro oo waa neef dabeyleed kaa isku illow, haweenka tan ka soo baxda ee gaarinimadeeda tallaabo dheer sii qaaddayna waa taa, dabadeed, Dabeysha aynu naqaanaa waa yahay. Qoladaa shakiday maxaa markaa meesha soo geliyay ee tiri kelmadda tan dee waa cay waxay arkeen waagii hore magaalooyin ma aanan lahaan jirin ee markii magaalooyin la soo galay oo gabdho yaryar suuqooda iska galay la arkay oo lagala xishooday in la yiraahdo dabadeed waa dumarka xun xun ayuun baa dad Masqaro waxay isaga yiraahdeen Dhabeeci bey ku jirtaa. Ina hebel meeday? Waa tii baxsatay oo dabadeed Jabuuti iyo meel baas qabatayoo Dhabeela ay gashay oo waa kelmad cayna ah laguna daboolayaa hablahaa fiicfiican bey ku jirtaa kolkaasaa rag intuu qabsatay oo sacaaro dhegtooda wax badan ku soo dhacay yaa kuwaa dagaalami gaaray war ma Dabeyl baa lagu sheegi karaa wanaag markaa dabadeed maahmaaho sida Shiikhu sheegay la yiraahdo “Dhabeyli dhul ma maaxdo”, ma soconayso gabar dhabeyli noqonaysaa oo ma socon karto amase gabayaal baan markaa u soo qaadnay oo dhawr ah yaanu cokosiinnay oo ay dabeyshu iska leedahay iyo barafkii neef dhabeeleedka ahaa markaa dabadeed dhabeesha iyo gaaridu dhabeeshaaba sii horeysa waxa kale oo baalida ku jirtay oo gelow ku soo baxday ee garbasaar ama hees hooyooyinku ay ku heesaan, Dhalmaan iyo naag dhareer la yiraahdeen in bey dood dhicin dhaqaajo dhaqaale ku gaari maysuu dhalmaanyadaas aynu kaneecada ku sheegnayna ee ogow oo iyaduna kuwii xuxumaa bey la socotaa ee baalida ahaa dhalmaanyo oo suugaanta marba meel waxay soo geliyaanoo wax tilmaamaya waa yahay; Dhalmaanyo iyo naag dhabeyl ah in bey soo kaceen dhaqaajo dhaqaale ku gaari maysid, iskama hor imaan karayaan. Markaa dabadeed horta halkaas yey mid waliba qaar badan aynu garanayno inay caydu wax ka maqan yihiin amaantuna wax ka maqan yihiin ayadoo horta halkaa, Hadiiqo waa taas oo iyaduna waxay la tartamaysaa dhabeyshii iyo gaaridii wax ogaal bey ku darsatay, hadiiqaddaas waxa la leeyahay waa sidii dabeeshaasu naagaha uga tagtay yay gaarinimo iyo aqoon siyaado ah iskugu darsatay oo haddiiqay la baxday taasina halkaa weeye, iyadoo ammaantii iyo caydii aan weli soo koobeynin hakaas baan uga baxay oo anigu Xaaji Maxamed baan ku wareejinayaa.

X. M. Lii./ Daahirow middaas saddex walxaato waxay yiraahdeen saddex saddex yaa laga dufsanayaa maahine saddex kuuma ah; ratigaasi xil qaad buu leeyahay oo ger qaad ma leh haddaad maqasho geel la’aanaa laga dugsanaa ee ratigaasi geel ma aha, faraskaasi koora saas uu leeyahay ee kabtin ma laha haddaad maqashana oo neef kacdhin leh ma leh fardo la’aanaa laga dugsanaa ee faras ma aha, naagtaasi wax la cun bey leedahay haddaad maqashana naag la’aanaa laga dufsanayaa maahine wax la cuntaas waxay kuu muujinaysaa waa laba nin oo is qabta maahine mid naag ah meesha ma joogto. Hadallada middaas ay ku tusaysaa.

Aw. Daa./ Bal Axmed Nuurow waxaan jeclahay haddaba inaan meel kale haweenkii wanaagoodii iyo xumaantoodii kala saarnaye bal meel kale yuu

hadalku inaga baahine ama nin kale weydii bal meel kalena inoo taabo.

C. Mudiir/ Waxaan rabaa inaan tuusiyo Xaaji inaan xusuusiyo Xaaji waxaa jira waalilow Odayaashiina xagga ugu isticmaashaan, nin baa odayaal guriga u joogaan akhyaaraa u joogta xaaskuu rabaa inuu u baaqo saan buu leeyahay oo saan buu leeyahay baaqa noocaas ah naagaha leh ayaan rabaa bal in aad ka sheekayso.

X. M. Lii./ Nin la arkaaba waxbuu u yaqaanaa nin baa gabyayoo wuxuu yiri asagoo naag u digaaya:

"Ardayda iyo sidii macallin yaan kuu afbarayaa timahaaga ee qaday haddaad subag la eegeysid buux ha ugu shubin marada yuu bi'inin.
Afka maydh ilakaha cadayga mari oo indhaha kuulo uskagna naag lagu nacyee yuusan kugu aalin.
Aduunyada u roor xoolaha dhammi arwaax u doone ul haddii aan kula dhaco adoo maal ka iil dhuuftay.
Hana ooyin "Aabbowna" ha oran hanase awsaamin adoo i leh yeysan reero kale ku ogaanin.
Afartaas haddaad oofisoo oo uu wada yeesho abaalkaa Ilaah baa gala ee igu asluub dhowro, haddii kale ibliis yaannuu noqon ubadkaa dhowr".

Ikhyaar hadday u fadhido mar haddii ninku mar madaxuu taabanayaa oo waa wax lagu heshiiyay, mar saas buu leeyahay dhinac buu taabanayaa waa wax lagu heshiiyay, mar sidaas buu leeyahay oo dhinaca uu taabanayaa waa wax lagu heshiiyay. Mar saas buu oranayaa oo gacantuu taagayaa waa wax lagu heshiiyay, luguhuu saas faraha u gelinayaa waa wax lagu heshiiyay faraha markuu geliyo wax dhulka ku jiray oo la isla ogaa soo bixiyuu leeyahay. Dhinacaa hadduu taabto ariguu u dirayaa inuu looma maleeyo. Dhinacaa hadduu taabtay neef sarar leh yuu uga dirayaa xoolaha, hadduu sidaa yiraa wax la karinayo oo ama shaah ah amase caano ah waxay doontaba ha ahaadeene wax la cabbayo uun weeye, mar hadduu sidaa yiraahdo wuxuu ogyahay jiirka wax guriga suran oo ama waa oodkac ama waa caano karuur ah oo wuu ogyahay hadduu madaxa taabto intii ka sokeyda madaxa meel ka sareysoo la taabto waa la yiraahdo hadduu majaha taabto oo sidaas yiraahdo marti weeye ma ahaha ee waxaad keeni karto keen weeye, waan ka baxay.

C.Dhega/ Anigu in yar ayaan idinkugu darayaa qibradihii yaan, marka xoolaha raggii hore uu ee heesayey waxay dhihi jireen: "naago dabadeed waa basarkii tan aad sheegaysaan waa kala fududahay oo qaar baa sii daran qarni dabadii waa bakhayl fulay naago waa barbar kibir ragna dabadii waa bakhayl fulay oo ninka fulaynimo iyo bakhaylnimo isku darsadaa ceeb dherraad ah buu leeyahay naagta baali iyo kibir isku darsataana ceeb dheeraad ah bey leedahay". Nin kalana wuxuu yiri: "dhabeel maasha dhabeel lulatana dhaafi kuma gado, dhoocil luugtana dhaydax kuma gado" buu yiri, naagta dhaydiyay iskaga dhashaayoo subagga kama lulato, naagta dhabeesha ahina weligeed gurigeedba subag kama marto ee aad u lulata horta sidaasaan ku maqli jirayoo waa kala daran yihiin waana isu midee faras iyo naagaba waa hoodo oo baalida iyo baalli caanaydaan, baalida oo hadday leedahay maradaadii caruurtii iyo wixii oo dhan waxay iska leedahay

geesgees haddana had iyo goor gurigeeda caano iyo barwaaqo iyo waxaasaa ka buuxa oo baali caanooy baa la yiraahdaa oo xoolihii baa u bullaalay oo neefka u dhashaa neefka u curta xoolaha waa ka fiican yahay oo baali caanooy baa la yiraahdaa.

Midna batir kibir baa la yiraahdaa iyadoo basari ah bey kibir ku darsatay haddana waa tan adduunyada ugu xun, raggana waa kan la yiri ragga beledka waa bakhayl fulay nin biiq ah markaasuu bakhaylnimana raaci oo yaa wadi dee hadduu labadaa isku darsaday oo waa labadii ragga u darnaaye? Waa mid. Midna waxaa la yiri ninku waa kan u yimid tanaa tiri ninka naag buu tilmaamayey hadduu wax walba uu sheegay yay waxba garan weyday oo yiri: “Naa bal anigu adaan ku eegayaa martiduna anay i eegaysaa anna adaan ku eegayaa aqalkuna aduu ku eegayaa, bal aduguna yaad eegaysaa oo aad sugaysaa” buu yiri, “aqalku aduu ku sugayaa, martiduna anay i sugaysaa, anna adaan ku sugayaa adiguna yaad sugaysaa?” buu yiri, maxaa kuu haray marka si walbuu wax ugu sheegay, horta waxyaabahaas naa aynu ka haynaa naagaha raggii oo dhan markii hadalka murtida ama uu ku heesaa ama wuxuu ku daraa waxyaabaha uu xoolaha ku arko oo murtidu ku soo baxdaa anniguna intaas ayaan kaga baxayaa.

X. M. Lii/ Bal imminkana waxaan u gudbinayaa Sheekh Abuu Cabdi.

Sh. Abuu/ Bismilaahi Raxmaani Rax. Anigu Afkaan Maaymaayga ku hadlaayo Afka Banaadir in aan ku hadlaan rabaa maantana, Fiqiburaalow, waad mahadsan tahay, intii inta joogto waad mahadsantihiin. Haddaad ii ogolaateen in aan ku hadlo afka Banaadir, wax yar baan ku darsaa, waxaan ka bilaabaa naagaha oo la aaminay mise naagaha la amaanay naagaha la amaanay marba waxbaa laga sheegay, marka Dhabiil dhabiilka waa la isla qabaa oo waan niraahnaa dhabiil iyo baari. Baari waaye naagtaas iyo Raaliyo ninkeeda waa ku dambeysaa naagta Raaliyada eh naagtii u koreyso raaliyo oo raggeeda kelmaddiisa kelmad soo saareynin wax alaalo wax raggeeda oo ka hadlo ma hadleyso, “marxabba abboo marxabba”, waa Raaliyo qofkasta oo jooga kama xishooneyso “marxabba abboo marxabba”, dhibkeeda ha ahaado kelmaddiisa kelmad kuma dareyso, ma khilaafeyso waa raaliyo dadka oo dhan waa ogyihiin naagtaas waa raaliya oo waa lagu maragfuraa oo dadkii oo dhan baa ku marqaati furayaan oo waa raaliyo, marka naagta raaliyada eh wax baa ku dhex jira xaalkeeda naagtaas oo raaliyada mid la khilaafaa jirtaa ma raaliyo (Ilaahay) oo yacni sideeda ku aakhrisanayso iyo raaliyo baarinimo oo iska yeel yeel baa jirto oo maxaa lagu kala garanayaa oo lagu kala garnaan mise logu kala kartaa? Bal AwDaahirow maanta Sheekh Abuu afka Banaadir bal dhegeyso daraad waxaan ku hadlay afka Maaymaayga, may la kala kasee, marka maxaa lagu kala kasaa? Waa mar bey yacni oo dhacday maalin maalmaha ka mid ah wiil yar adoogiis oo dhalay yiri: “Wiilkee waa naag baan kugu daraa waa baari bey ii tahay xagga beerta, xagga xoolaha, dhinac walba yacni wiilkay yacni baari baad ii tahay”; aad iyo aad wiil oo baari u ah oo adoogiis u dambeeyay, hooyada iyo aabahana waxay qabeen halkaas wiil, wiilkana weligiis ma khilaafin aabihiis dhalay iyo habarta dhashay, meel walba meeshii loo adeejiyo ma diido, waa baari. Marka hooyadii iyo aabihii waa heshiiyeen oo waxay yiraahdeen: “wiilkiina haloo guuriyo oo naag aan ku darno deriska waa baari raaliyo, laakiin raaliyo oo wax ku jiro waaye oo

ayaa dhacday markaas wiilkii iyo habartii ay shooreen marka adoogii ayaa dhahaayo labadood, habartana waa la ogyahay labadoodaa isla hadlayaa beerahay jireen, markey beeraha ka soo shaqeeyeen ama ay soo faleen oo ay fadhiisteen, waxay yiraah ee “wiilkee wiil baari ah aad tahay waxaan rabaa inaan kuu aroosiyo naag aan kugu daro, naagtii oo ninkaas nin hebloow gabdhiisii oo garoomey eh oo geber binaan eh oo yacni haddaa soo baxaday oo madaxeed saruurkii oo jaran in aan kuu minin geeyo, kuu jiriyo ayaan rabaa oo haddalee soo baxday oo naasaheed binaan eh gabartaas binaan eh joogaan oo jinnaan eh gabartaas inaan kuu geeyo oo aan kugu daraan rabaa”. Marka wiilkiiyaa yiri: “Ciddaas gebertooda maad igu dareysaa?”. Adoogaa yiri: “Haa”. “Laakiin ay tahay kuma ogaadii geber oo hooyadeeda oo kale eh, waxaan rabaa hooyadeyda oo kale ah, adoogeygiiyow ii jeri geber hooyadeyda oo taas camal ii aroosi”, “Wiilkeygiiyow sideed ku ogaatay hooyadaa? Oo maxay tahay?”. Wuxuu yiri: “Hooyadayda waa baari, waa raalliyo, waa kaa dambeysaa, deriska dhan waa la ogaaday, waxaan arkayaa inay ku dambeyso oo baari tahay, raaliya ii tahay ogaaday, taas oo kale ii raadi oo ii guuri, taas oo kale igu dar. Doonistii waa daaran gebertaas oo kale daaran igu geey, ee ciddeed yacni daaraan iigu geey doonis gebertaas oo kale ii guuri, marka geberta aad i sheegayso hadday taas tahay bal yacni soo ogow, siday hooyadey oo kale tahay hooyadeed kolleyba ina saas tahay ina saas ay noqon doonto”. Geberta la guursanaayo waxaa lagu guursaa yacni iska guurso maaha hooyadeeda siday tahay, siday u dhaqmaysa, siday baari tahay, siday raalli u tahay, siday yacni martida u sooreyso, siday ragga uga dambeeyay, sidaas oo kale weeye marka geberta la doonanayo sidaas baa loo fiiriyaa aa taas siday ku soo baxday in la ogaado. Waxaa haddana loo weydiinaa markii la si yiraahdo ha la ogaado deriskaa la wediinaa, waxaa la deriskaaga ilaali deriskaa la weydiinaa: “Ciddaas baan rabnay inaan geber ka doonanno oo aan ka guursano siday yihiin ciddaas? Oo sidee bay u dhaqmaan?”. Geberta lama ogaan karo mid waa foodley waa garoomey waa geber waa gellaan, laakiin sidey tahay maamulkeeda dhaqankeeda, siday u soreysaa martida, siday deriska ula dhaqmaysaa, sidee ay ninka uga dambeysaa, wax baa la weydiinaa, markii la ogaado deriskoo wax ka sheego warbixin ka bixiyaan bacdi markaas la ogaado inay fiican tahay oo ammaano oo la dhaho qoftaas qof fiican weeye oo raalliyo ah oo baari eh oo ninkeeda ka dambeyso oo deriska dhowrto, ilmaheeda aad iyo aad yacni ilmaha u wanaajiso ilmaha yacni subaxii u qubayso, gurigeeda oo nadiif eh la arko, subaxii waxaa la arkaa iyadoo iyo nadiif banaanka u soo baxaysaa iyadoon nadiif ahayn banaanka uma soo baxayso, nadiifdiin maradeeda oo wasaq leh lama arkaayo, geber fiican naag fiican wanaagsan naagtaas ilmaheedana aad bay u ababisay, sidii iyadoo kale markii la yiraahdo markaas baa la raadina oo la guri geynaa. “Marka mid waa sidii gabadha aad sheegeyso ma tahay taas?”, “Haa”, dheh, “Haddaan dad u diraa” buu yiri “dadka waxaa loo diraa oo deriska eh ilaali ahaan baa loo diraa dadaa loo diraa oo waa la soo ilaalina”, “Marxabba” buu yiri, ayuusan loo diray gabadhii uu adooga doortay ee uu rabay inuu ku daro wiil is rabi, iyadoo habarteeda waxaa lagu soo qaadaa ilaalo, ilaalayaashii deriska loo taga jujida soo ahaa, ilaalmayii, waxaa la yiri gabadhaas oo wiilka qabo habarteeda saas baa u dhaqmaysaa waa geer yacnii oo dhinacona leh ku maamuuskeeda xun aabihii ayaa loo sheegay isagana wiilkiiyuu u sheegay, “Saas baa lagu soo sheegay gebertii aan aniga kuu rabay bal siday kula

tahay?”. Wuxuu yiri: “Too kale hala ii doono sii sibi! Sibi! Sibi! Loo lahaay”, bal waxaas yiri adooga: “aan horta tijaabinno oo hooyadeeda laftirkeeda aan dib ugu noqonno inay baari tahay adaan ku tusaa oo tijaabo aan ku suubinno inay raaliya tahay, bal adaan ku tusaa, haddii waa run naag miday tahay lama ogaan karo hooyodeeda siday tahay gabadha waa iska beddelaysaa. Tobankoo beraysoo marka waxaa la arkaa hooyadii oo baari eh gabadhii ay si kale eh aani baari aan ahayn, mid hooyadeed yacni canyaasi eh oo baari ahayn bacroole eh oo gabadhii ku soo baxdo, geber yacni oo baari eh oo yacni xabiib eh ku soo baxdo ayaa la iska arkaa marka waa la haayay intoo bal habartaa ku dhashay aan tijaabin ku sameyn aan ku tuusanay baari tahay, raalli waa tahay, inay raalli tahay oo bal habartii aan ka sal gaarno, yacni sir naageed lama sal gaari karo” aabihii yaa dhahaayo “marka aan ogaanno”, “marxabba”, marka hooyadii waa loo sheegay: “gebertaasaa la soo doontay, saddex gebdhood loo doonay waa loo sheegay wiilkaaga waxaa rabaa inaa geber raalliyo eh, adigoo kale aa rabaa wiilkaaga ee aan u jerino ha loo raadiyo”. “Anigoo kale ma la arkaa. Anigoo kale wiilkeyga nasiibkiisa qabaa haddii la arkaayo haloo raadiyo sidii sidaas loo lahaa”. Wiilkii iyo aabihiis beerahay u keceen waa showreen, waxaas yiri: “See lagu ogaanaa habarteyda raallinimadeedii iyo inay raalli ahayn, naag saddex walxaato ayaas kugu soo baxaa”. Ayaas yiri: “Inanay naagtii ee naagta aan kugu daray inay tuug tahay ama inay raalliya tahay ama inay yacni gogol dhowrto tahay, sidii habarteyda oo kale ma dhihinoo, adiga habartaada saas baa lagu sheegay laakiin waxaanu tijaabo suubinaynaa taas baan kugu tijaabinaynaa”. “Marxabba”. Wiilkii iyo aabihii waxay yeeleen shimbir baa soo qabteen duurkay aadeen hal shimbir baa soo qabteen. “Shimbirtaan aan gurigeynaa, shimbirta haddii geyno oo habartaadaan u geynaa, habarta markuu u geyno dhiil cuseebta ayaan ku dhejinaynaa aan dhahaynaa markii shimbirta dhiisha iidoo keeno iidoo arka isku dejino daboolno aan iri, wiilkey iyo anigaa iska leh iggarkay meel noo dhig hanalaga taabanin”. “Iska dhaaf, shimbirta lama tusaayo, dhiishaas noo keen walaxaan ku ridanaydaa, dhiishii yey keenee shimbirtii yaan ku ridaynaa oo waan daboolaynaa dhiishaas meel inoo dhig alaab ayaa inoogu jirta ayaan dhahaynaa, alaabtaas dhinac walba ayaan ka fiirinaynaa oo aaminnimadeeda ayaan fiirinaynaa”, “marxab”. Shimbirtii ayaa la keenay oo iyada lama tusin, waxaa la yiri: “Dhiishaas noo keen”, dhiishiyaa la keenay ma dhiisha, “Maxaad ka yeelaysaan eberkeeda?”. “Maya, adiga eberkeeda noo keen”.

Dhiishii haddii la keenay wiilkii iyo aabihii dhalay, waxay ku dajiyeen shimbirtii, oo habartii ma ogeen. Waa ku dabool waxaa loo dhiibay hooyadii ama habartii, baa loo dhibay oo yiri ama habartii baa loo dhibay. Habarta “Qaad” baa la yiri, “oo halkaas noo dhig aniga iyo wiilkay waxaa noogu jiraan alaab aan ku degsanay inoo dhig”, waxaa la tijaabinayaa dhinacoo aaminnimadii, “marxabba waa raalliya yaan nalaga furin”. “Maxaan ka furaa adiga iyo wiilkaa meel dhigateen? Aniga waad igu ogtahay aaminnimada waad igu ogtahay ee maxaan furideeda ku falaa?” Xagga la dhigay wiilkii iyo aabihiis waxay u baxeen beeraha waa israaceen. Habarta waxay is tiri: “War maxaan meel ku jira? Maxaa weeye? Bal aan fiiriyo!” Markaas ka bacdi saan ay u furtay, shimbirtii ayaa ka buubtay, dhiishii ay furtay shimbirtii ka buubtay, yaa soo qabanaaya? Hee, oo waa baxdaye, horta meeshii aaminnimadii waa ka tagtay, waa soo noqdeen, markay soo noqdeen la yiri: “Bal ka dhiishii noo keen, alaabteyna aan ka fiirsanee”. “Meesheedii bey

idiin taallaa ee soo qaata". "Maya, adiga lee meeshaas ma dhiginoo". "Haa". "Waa yahay, ee noo keen". "Meesheedii bay idiin taallaa anigu maxaan ku falaa waan idiin keenaa". Waa keentay. "Iyadana soo fadhiisaa" baa la yiri, waa soo fadhiisatay. "Fur". "Maya, maxaan u furaa aniga ma leh oo bal maxaan u furaa?", "Maya, hadda waa ku idin waaye, adiga aamin aad tahay bal fur, haddaan ku tusaynaa waxa ku jira, fur". Waxaa lagu tijaabinayaa dhinaca aaminnimada, markaas ay furkii iyo diidayso, hadday furtay, eberba waaye! "Aawey alaabtii ku jirtay aan hadda ku ridnay?", "Maxaan ka ogahay?" bay tiri. "War alaab baa inoogu jirtaye aaway?" buu yiri, "habartayda see waaye adiga aaminad baa tahaye, been ma sheegayso baa tahay raalliye waxay oo maxaa yacni alaabtii, yaa soo galay meesha? Wiilba aniga lee ka jooga, wiilka lama joogo, geber lama joogto, yaa kuu yimid? Qof soo galay ma jiraa? Waa maya, hadda aawey?" baa la yiri. "Alaab baa ku jirtay halkan oo alaabtii ma leh. Hadda iska dhaaf" baa la yiri "oo halkaas iska dhig". Waa ogaadeen horta mid oo aaminnimadii , "Hooyadaa inay aamintahay waad ogaatay inaan la aamini karin hooyadaa ku dhashayna aamin tahay baari tahay raalliya tahay, halkaan waa ogaatay imtixaankan ahaa, imtixaankan waa ku dhacday ee ogow". Markay is raaceen, wiilkii waa uu yaabay in marnu mudaynin hooyadaa la yiri alaabtaan hanaga taaban ay daba marto oo furto, ma mudaynin inaa habartiis saas yeeley, waa ku dhacday tan. "Waxaa soo haray waxaan ku tusaa la yiri gogol ma dhowrkiinimadii, gogol ma dhowrto waa raalliya oo qofkii ah bis waaye yacni waa gogol dhowrto, raalliya tii u dambeysay waaye". Markaasaa wiilkii iyo aabihiis beerahay u ku soo tashteen, "Waxaan ku tusaa" baa la yiri "haddana kii gogolmadhowrtonimadii ayaan ku tusaa", "Hayeh aabbo" ayuu yiri, markaasaa wuxuu aabihii meel ku sameeyay asal wiilkii eedadiisa aabihii la dhalatay ayaa la yiri: "asal meel noogu oo samee", "Maxaad ka falaysaan?" bay tiri, "Anagaa rabno ee noo samee". Asalkii asashaa baa la soo qaatay duurkaas la aaday wiilkiiyaa asalkii la siiyay, waa cabbay, "Guriga tag" la yiraah "adiga is rid oo aa! Aa! Aa! Dheh, marka is mataji". Wiilkii asasha la soo siiyay, waa soo raaceen wiilkii iyo aabihii dhalay markii qolka la soo gaaray, wiilkii ayaa galay , wiilk galay waa is riday, matag baa isku keenay markaas wuxuu matagay asalkii oo dhiig oo kale ah, markaas bay soo oroday oo habarta dhashay: "Mar wiilkay maxaa ku daaray oo maxaa ku daaray?". Maba hadlaayo aa! Aa! Aa! Waa cabaadaa, isagoo cabaadaayo baa adoogu ka soo dambeeyay soo galay, hooyadii: "Waana la soo dilay, marka soo galayba saan ayaan ku arkayo, u soo saas u booraayo oo oohaayo oo matagaayo dhiig matagaayo arkay", adoogii aa loo sheegaa, markaas markuu saas u fiiriyay wiilku waa matagayaa oo mar walba waa iska keenaa, markaasaa ee bal: "Waxaan u rooraa ee qof yacni ee wax daaweyo ayaan uu roora sidii lagu daaweyn lahaa ayaan ku dadaalaynaa, marxabba, Illaahayoow wiilkaan in aa loga dhinto ma rabnee dal inaa qof wax daaweeyn ayaan raadinaynaa inaan soo helo, marxabba". Marka adooga haddiis baxay habartii mid ay yeesho iyadoon lahayn oo wiilka ku ooyneyso korkiisa adooga wadaad oo uu keenay, waxaas yiri, "Waxaad yeelaysaa meeshaan ma'sa ayaa ku jirta, waxaan rabnaa wiilkay aan tijaabo inaan tusaan rabaa. Tijaabadaas yarisaa bal ee hooyadaana oo habarta dhashay inay aamin tahay, gogol dhowrto tahay, wiilkaygaa wuxuu yiri hawaanba naag hooyaday oo kale ah ii mehri, ii guuri, iigu dar, iga aroosi, ayuu igu xujeeyay, wuxuu u yiri, bal hooyaday tijaabo ka naag kugu daraayo isk aroos oo iska tawakal waa igu iri, hadda

aniga tijaabadaas ayaan u yeelayaa balkaalay", wadaadkii yaa la soo wacay. Wadaadkii markuu fadhiistay markaa la yiri een habarta dhashay waxaa in ay gogol noo dhigayso. "Si lagu ogaado wiilkaan lee maad dhashay". "Haa". "Hadda wiilkii waa la daaweeynaa ee waxaa lagu ogaanaa, adiga bal ka tallaabso". Habarta ka tallabso ayaa sidaas la dhahaa. "Hal mar uga tallabso kaddibna waa la daaweynaa". "Marxabba".

Markay saas lugta u qaadday inay dembi gelin ayaa la rabaa, adooga waxaas yiri: "Maya, maya, maya, waa naagtee, waa gurigeed, naagteyda dembi ma gelin aniga foodley bey ii ahayd iyadoo garoomey eh, iyadoo geber ah daruufkeeda ee joogaan guursaday ilaa hadda lagu joogo wiilkaan baa ii dhashay, dhaloowgana Illah baa iska leh, waa aamin, waa baari, waa raalliyo, anigaana shaashka saaray, waa aamin, saas miyaa? Haa, oo waa daahirsantahay dhaahir waaye naagtaan, marxabba". Iyadana waa maqlaysaa, "Hayeh ninkaaga waa ku aamanay bal ka tallabso". Markay lugta saas u qaaday wadaadkaa yiri: "Sug! Sug! Halkaan wiil baad qabtaan oom Illaah idin siiyay ee waa ninkaagana waa ku aamaanay laakiin markii aad ka tallabso waa dhimanaa haddii daahir aadan ahayn laakiin ibna aadan baad tahay, bal xasuuso inaad dhuudimo laguu soo galay. Dhuudimo waxaa xatooyo adoo hurdayso laguu si kale ugu maray, bal xasuuso, adoo yacni beeraha jirto adoo buur jirto, bal xasuuso, bal xasuuso, wiilkaaga waa adiga dhimanin, bal xasuuso", wiilkaa waa jiifaa oo aa! Aa! Wuuna matagayaa dhiiggii waa soo sheegay habartii: "Hayeh, joogso, waan xasuusanaa" bay tiri "haa, waa runtaa shiikhow markoo aad beeraha qorya ka soo guraayo mid baa yacni I taabtay halkoo halkoo mar", "Haa, macno ma leh" ayaas yiri, "halkoo mar lee maahinoo, bal ka tillabso, macno ma leh". Markay lugta saas u qaaday ayaa la yiri: "Bal sug waana dhalmo gooysay", iyada oo halkaas wiil ayaa u jooga markaasay tiri: "Adooga oo maqan baa nin ii soo dhacayoo bal anoo hurdaayo i soo iga soo maray". Wiilkii yaa loo danleeyahay ogow ayaa la yiri habartii yacni inay isbeddeshay aa loo geeyay gabartii hooyadii ahayd yacni oo baari ahayd oo aaminka ahayd lama ogaan karo naagta, gabadhii baa fiicnaan doonta ama soo hooyadii waa fiicnaan doonta lama ogaan karo. Oo wiilkii waa la ogaysiiyay, markaas baa la yiri: "Bes ka tallabso", markay ka tillabsatay wiilkii alaab baa saas loo mariyay, geedo-geedo yacni daawo Soomaali ayaa la mariyay, qur'aan baa la saaray, waa raystay wiilkii, markaasaa wiilkii iyo aabihii dhalay iska baxeen, berta aadeen, waa fadhiisteen, yiri: "Hayeh, wiilkay ma ogaatay hooyadii?". "Waan ogaaday, haa, waan ogaaday, bes waaye, wax aalaale iyo waxaad adiga keentid oo ciddii reerkii fiican u malaysid bal wax iiga doon". Saas aa wiilkii meeshii adooga inshaaray ee looga doonay geber looga aroos iyay. Bal naagaha haddii anigoo mar aan taabanno qaarkooda saas bey kala yihiin, naagtii waxaa lagu ogaaday iyadoon la faafinin, wiilkeedaa looga dan ahaa in la ogaysiiyo ninkiina waxba maka faafinin, amuurta wiilkaa looga dan lahaa, bal saas waa soo dhacday, marmar saas bay naagaha ku dhex jira oo baarida eh raalliyada iska eh xagga naagaha haddii la yiraahdo baarinimadood meeshaas ayeey maraysaa.

Tan kale Aw Daahir sheegaya awootadeeda marka waxaan rabaa inaan ku sheekay mar yacni adduunyo naag inay wax cajuuso inaan ku darsadaan rabaa. Waxaa dhacday beled weyn oo dhisan oo suldaan joogo talo weyn lagu hayo, talaa ka socoto, taladaas ka socoto suldaan baa ka talinayey, marka taladii siday u socotay waxaa la arkay hal wiil baa dhaleen wiilkii wiil

kale oo faqiir, cid faqiir eh yacni oo waxba haysan wiilkaas baa haddee oday noqday, wiilka kan soo la saaxiibay waa la socon waayay ciddaas wiilkooda oo faqiirka eh ee waxba haysanin ayaa waxaa noqday saaxiib, marka wiilkaas oo faqiirka eh oo reer dhibaato eh iyo wiilka suldaanka ayaa saaxiib noqdeen, markii saaxiib noqdeen cidda ayaa aad saaxiib u noqdeen. Marka siday isulka socdeen oo beledka oo dhan wiil oo la socda loo waayey ayaa lagu fur yacni ee la isla yaabay. Ciddaan oo faqiirka ahayd ee reer dhibaatayd waa iska dhaqan yihiin oo xaggaa wax lagu soo siiyaa wiilkood ayaa suldaanka wiilkii saaxiib la ah, markaasaa la yiri beledka oo dhan ilmaha joogaan caruurta joogaan loo diiday oo wiilkaan saaxiib ula noqday bal wax yaab leh, sidee la yeelaa? Waa loo fadhiistay, see loo kala goyn karaa wiilkaas iyo wiilka suldaanka.

Si kastaa la yeelay namiim baa loo geeyay war baa loo sheegay, marka ee odayaal bay war ku sheegeen waa la kala goyn waayay waa la kala goyn noogay. Marka waxaas yiri: “Aniga wiilkay waxaa aan ku ogaa wiilkaas, wax kasta hala sheego wiilkaasaan saaxiib nahay”. Habar cajuuso ayaa loo tegay, habartii cajuuso ahayd bal waxaa dhacday in reerkaas ay jebiso. Haddii naagaha aan wax ka sheegno horta cajuuso waxay ka bilaabataa mar hadday gaar soddon iyo shan sano, afartan sano xagga u dhaafto waa cajuuso. Waxaan maqli jiray naagaha markay sanad kasto shaydaan baa u badanaa, raggiina shaydaan baa ka nusqaamaa. Marka hee weynaado hor baa u qaboowaa, naagahana shaydaan u badanaa, marka naagtii cajuusada ahayd baa loo tagay ayaa loo shooriyay, waxaa la yiri: “Yar kaas suldaanka dhalay iyo yarkaas ciddaas sidee lagu kala goynaa?”, “Taladaas maad ii keentay?”, “Haa”, “Wax halay siiyo” ayay tiri. Waxaa loo geeyay afar kun oo Shaariq, waxaa la yiri: “Kala gooy labadaas wiil”. “Ma ka noogteen?”, “Haah, ayeey dhaheen”, “Maanta, og” ayay tiri, “maanta galabtaan ayaan kala goynaa bes” ayay tiri. Cajuusadaa sidaas dhahayso, habar mar hadday afartan sanadood gaarto magaalo waana gubtaa waa dumisaa waana dhisaysaa. Afartii kun ee Shaariq ayaa loo geeyay, “Iska baxa” ayay tiri. “Sideed wax yeelaysaa?”, “Bal wax ogaada. Odayaashii banaanka u soo baxa, markii galabta wiilkaas iyo wiilkaa ay baxayaan markaas aniga aan ka shaqaysanaa oo wax yeelaa ee markaas arka oo hadda banaanka soo baxa”. “Marxabba”, odayaashii banaankay u soo baxeen oo fadhiisteen, odayaashii iyo akhyaartii iyo duqowdii iyo culamadii oo beledka degenaayeen waxaa dhacday cajuusidii iyadoo meelba raadinin oo banaan ka soo fadhiisatay mar allaale iyo markii wiilka suldaanka dhalay fariistoo koray, kii kale oo saaxiibkiisna derajada soo koray, galkii waa falaadayaan faalin faalin bey u baxaayaan markay baxeen fariisto oo socoto, waxay ku dhawaqaylisay wiilkii kale oo miskiinka ahaa ee la rabay in laga reebo ayay ka daba qaylisay, kii suldaankana fariista waa joogaa kii kale gadaal ayuu u soo noqday haddii joogsaday waa u tagtay odayaashii banaan u ku soo deer, banaankay joogaan oo waa fiirinaayaan iyadana waxay ku ballan qaaday galabtan maanta ugu dambeyn in ay kala goyso. Wiilkii faraska fuulay markii ay saas u soo wadatay kii suldaanka dhalay waa arkaaya oo gadaal buu soo fiirinaayaa, dhegta ay saas uga qabatay waxay tiri iyadoon waxba sheegaynin: “Waxa waaye! Iihiih! Haaheey kaas yeel! Iyaa! Hee! Aaheey! Bax hee bax”, markaas waa joogsaday waxaas yiri: “Ma kasin horta aniga maya”, “Kaaley”, haddana “Saa! Iyaa! Saas! Saas weeye!” kii waa soo arkaayaa oo saas ayuu u soo fiirinaayaa saddex jeer baa u joogtay ay saas tiri oo waxba u sheegaynin,

waa iska dheh kii markuu gaaray haddii joog wuxuu yiri: “Habartaan jinni maxay kuu sheegaysay? Waa kuu yeertaye, maxaa kuu sheegaysay?”, “Saddexdii jeer ay ii yeertay, waxba iima sheegin, waxaa tiri wax aan macno lahayn waxaa ay ii sheegaysay: saas yeel! Saas yeel! Iihi iihi haaheey!”, “Maya, maya, maya, waa ku soo shoorisay ee shoorka ii sheeg waxay kuu soo sheegtay”. Fidmo meeshii ay u dhalatay, “Arse waxba iima soo sheegin”, iyo “wax kuu soo sheegtay”, waa la soo noqday, “bes waaye ma is raaceyno waa ku soo shoorid bes weeye” ayaas dhahay. Iyagoo doodayaan waa u jeedaan odayaashii, waa soo noqdeen gurigaa la aaday. “Kan aniga bes waaye aabe habar ayaa ii soo shoorisay shoorka waa iga qarsaday, waa la warsaday”, “war wiil adaan kugu aaminaye, maxaa jiraa? Intaan baad socoteene, shoorkii dal waxay kuu soo sheegtay wiilkay u sheeg, haddana ii sheeg”. “Wallaahi waxba ma ii sheegin ar aabe oo waaye wax macno lahayn bay ii sheegtay: ayaa! Ayaa! Iyo waxaas waxaas ayay ii sheegtay oo wax aan macquul ahayn oo waxba ahayn bay ii sheegtay ee ogow”. “Maya, maya, wiilkay yacni waxaad yeelaysaa intii warkaas aad ka sheegtay gurigiina iska joog oo wiilkayna mala soconaysid, bes waaye adaa lagugu aaminay oo waad khiyaameysay”.

DHAMAAD!